

IIB MA GALO

FAAFINTA

RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho 28 Maajo 1982 L. 1R5—bis

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 14 ee 5 Maajo 1982, Oggolaan-sho Heshiis lagu asaasay Macadka Bog. Maamulka Shaqaalaha Gobolka Afrika oo ku hadla afka Ingiriisiga. 411

SHARCI L. 15 ee 13 Maajo 1982, Mashruuca Waraabka Mogaabo. » 412

LAW N. 15 on 13th May 1982, Mogambo Irrigation Project». » 418

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 31 ee 5 Maajo 1982, Meelmarin Heshiiska la- » 424

DECREE N. 31 on 5th May 1982, Instru-
ment of Ratification. » 425

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO IWM.

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 24.5.82,
Lumid Buug Kayd L. 1529 ku qoran » 426
Daahir Cabdi Guuleed L. 263.

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.5.82,
Lumid Buug Kayd L. 11366 ku qoran » 427
Mustafa Sheekh Maxamed L. 264.

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 4.4.82,
Lumid Jeeg War. L. 524961 ku qoran » 428
Ciyaartoyda ee W.H.Guud L. 265.

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI lambar 14, taariikh 5 Maajo 1982, Oggolaan-sho Heshiiska lagu asaasay MACHADKA MAAMULKA SHAQAALAH Gobolka Afrika oo ku hadla afka Ingiriisiga.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Heshiiska lagu asaasay Machadka Maamulka Shaqaalaha Gobolka Afrika oo ku hadla afka Ingiriisiga.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Geneva ee Dalka Switzerland taariikhdu markey ahayd 12 Juun 1979.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada heshiiska ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiska Sharcigah lagu tilmaamay.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saaraa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 5 Maajo 1982

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI Lambar 15 taariikh 13 Maajo 1982 Mashruuca
Raraabka Mogaabo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jam.Dim.Soomaaliya;

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Guddiga
Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

(*Dhismaha Mashruuca*)

1. Waxaa halkan lagu dhisayaa Mashruuca Waraabka MOGAAMBO oo ku yaalla daanta galbeed ee Webiga Jubba kana tirsan Degmada Jammaame. Hadda kaddibna lagu tilmaami doono «Mashruuca».

2. Mashruucu wuxuu yahay mid madax bannaan wuxuuna leeyahay awood iyo jiritaan qaanuuni ah.

3. Mashruucu wuxuu la mid yahay Mashaariicda heerkoodu yahay «A».

4. Mashruucu wuxuu hoos imaanayaa Wasaaradda Beeraha.

Qod. 2aad

(*Hawlaha iyo ujeeddooyinka Mashruuca*)

Mashruucu wuxuu ka mid noqonayaa horseedka Mashaariicda horumarinta ee Dooxada Jubba ujeedooyinkiisa waxaa ka mid ah:

1. Hirgelinta himilada isku-fillaanshaha, xagga cuntada iyo horumarinta dhaqaalaha Dalka.

2. Horumarinta Guud ee tacabka beeraha Dalka

3. Dhismaha carratuuryada fatahaadda iyo biyo qabadyo lagaga badbaado khatarta fatahaadda.

4. In lagu sameeyo Mashruuca gudahiisa dhul 200 hektar oo ay leeyihiin beeraleyda gaarka ah si loo helo diraasad lagu kala ogaado wax soo saarka hababka kala duwan ee beerashada.

5. In la xaqiijiyo helitaan shaqaale aqoon leh iyo kuwo loo tabbaro shaqooyinka sare ee xasaasiga ah, si ay u noqdaan kuwa u dhigma khubarada ajnabiga ah, aakhirkana beddeli lahaa.

6. In la qiimeeyo waxtarka barnaamijka tababarka ee sanooyinka 3aad, 4aad iyo 5aad si loo qaado tallaabooyinka sixidda ee lagama maarmaanka ah.

7. In la sameeyo qaab maamul iyo qorshe lagu sii talo galo in Mashruuca uu noqdo marka uu dhammaado Wakaaladda Madax bannaan ee Mogaabo.

Qod. 3aad

(Xarunta Mashruuca)

Xarunta Mashruuca waxay ahaan dcontaa Mogaambo, oo shaqadu ka socoto, Xaafiis-laamcud waxaa laga sameyn karaa Kismaayo ama meeshii kale ee ka tirsan J.D.S., oo loo aqoonsado inay lagama maarmaan u tahay in si quman loogu fuliyo Ujeedooyinka Mashruuca.

Qod. 4aad

(A w o o d)

Mashruucu wuxuu leeyahay awood uu ku fulin karo Ujeedooyinka ku xusan Qod. 2aad ee sharcigan.

Qod. 5aad

(Xubnaha Mashruuca)

1. Xubnaha Mashruuca waxay ka koobnaanaayan sida soo socota:-

- a) Guddiga Sare ee Mashruuca;
- b) Guddiga Maamulka;
- t) Maareeyaha Guud, iyo;
- j) Maareeyayaal.

Qod. 6aad

(Guddiga Sare ee Mashruuca)

1. Guddiga Sare ee Mashruuca wuxuu ka koobnaanayaa xubnaha soo socda:

- a) Maareeyaha Guud ee Mashruuca Gud/miye;
- b) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Beeraha X u b i n
- t) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta Qaranka »
- j) Agaasimaha Guud ee Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa »
- x) Maareeyaha Guud ee Dooxada Jubba »

Qod. 7aad

(Guddiga Maamulka)

Guddiga Maamulka wuxuu ka kooban yahay:-

- a) Maareeyaha Guud, iyo;
- b) Maareeyayaasha Mashruuca.

Qod. 8aad

(Hawlaha Guddiga Sare)

Hawlaha Guddiga Sare waxay ahaanayaan kuwa soo socda:-

- a) Dejinta Siyaasadda Guud ee Mashruuca iyo la socodka fulinteeda sida ku tilmaaman Heshiiska.
- b) Hubinta in Mashruuca loo fuliyay si waafaqsan qorshaha, farsamada, kharaajka iyo taariikhda dhameystirka ee bartilmaameedyada u ah.

Qod. 9aad

(Hawlaha Guddiga Maamulka)

Guddiga Maamulka waa xubinta ka xilsaaran Mashruuca, xagga qorshaha toosinta iyo taabba gelinta hawlaha Mashruuca, wuxuuna leeyahay awood madax bannaan ee dhinaca maamulka, maaliyadda, farsamada iyo hawl kasta oo soo geleysa ujeedooyinka Mashruuca.

Qod. 10aad

(Magacaabidda Maareeyaha Guud iyo Maareeya/sha)

Maareeyaha Guud iyo Maareeyayaasha Mashruuca waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne iyadoo la tixgelinaayo talada Wasiirka Wasaaradda Beeraha.

Qod. 11aad

(Awoodda Maareeyaha Guud)

1. Maareeyaha Guud waa madaxa Maamulka Mashruuca.

2. Wuxuu matilayaa, Guddoominayaana shirka Guddiga Maamulka, gaar ahaan wuxuu mas'uul ka yahay:

- a) La socodka fulinta qorshaha iyo barnaamijka Mashruuca;
- b) Qabanqaabada iyo fulinta qandaraasyada uu Mashruucu galaayo, isagoo dhawraya sharciga iyo nidaamka u degsan;
- t) Inuu heshiis la geli karo, isagoo tixgelinaaya go'aanka Guddiga Maamulka iyo oggolaanshaha Wasiirka, shirkado ama dad khubaro ah oo socodsiiya hawl maalmeedka maamulka iyo guud ahaan fulinta Mashruuca si waafaqsan heshiisyada la xiriira Mashruuca.

Qod. 12aad

(Xuquuqda Shaqaalaha)

Xuquuqda iyo waajibaadka Shaqaalaha, waxaa lagu dhaqayaa sharciga Lam. 36 ee 22dii Abriil 1972 iyo xeerka Lam. 74 ee 22dii Abriil 1972.

Qod. 13aad

(Shaqaalaha)

Mashruuca wuxuu qoran karaa shaqaalaha uu u baahan yahay iyadoo la raacayo sharciga shaqo qo-

ridda, isla markaas Mashruucu wuxuu awood u leeyahay inuu qaato khubaro Ajnabiga ah ee uu u baahan yahay isagoo raacaya sharciyada Dalka iyo oggolaanshaha Wasiirka Beeraha iyo hay'adaha maalgelinta Mashruuca.

Qod. 14aad

(Hantida)

Hantida Mashruuca waxay ka kooban tahay:-

- a) Dhulka Mashruuca loo siiyey horumarin awgeed;
- b) Amaahyada iyo Deeqaha kale ee Mashruucu uu galo gudaha ama dibeddaba;
- t) Wixii dakhli ka soo gala Mashruuca hawshiisa;
- d) Wixii kale ee dakhli soo gaia.

Qod. 15aad

(Miisaaniyadda)

1. Maareeyaha Guud, marka ay tahay 30 Oktoobar, ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa Miisaaniyadda sannadka soo socda isagoo faah-faahinaya kuna muujinaya iacagta dakhliga iyo kharajka Mashruuca.

2. Caddeynta Miisaaniyadda, waxaa la hordhigayaa Guddiga Sare ee Mashruuca oo uu shir-Guddoomiye u yahay Wasiirka Beeraha si loo oggolaado.

Qod. 16aad

(Xisaabaadka Sannadka)

1. Sannad-xisaabeedka Mashruuca wuxuu billaabanayaa 1da Jannaayo, wuxuuna ku dhammaanayaa 31da Dishember.

2. Maareeyaha Guud ugu dambeys 31da Maarso sannad kasta, wuxuu diyaarinayaa xisaab xirka sannadka la soo dhaafay, iyadoo la caddeynayo faa'iidada iyo khasaaraha sannadkaas, wuxuuna u gudbinayaa Wasaaradda Beeraha.

Qod. 17aad

(*Awoodda Ammaahashada*)

Mashruucu, si uu habsami ugu guto hawlihiisa, wuxuu ka qaadan karaa amaah Bankiyada Qaranka iyo hay'adaha Amaahda, marka la helo oggolaanshadda Wasiirka Beeraha iyo Wasiirka Maaliyadda.

Qod. 18aad

(*Hab-Xisaabedka*)

Xisaabaadka Mashruuca waxaa loo wadayaa sida ay tilmaamayaan sharciyada ay Dawladdu u dejisey maamulka xisaabaadka.

Qod. 19aad

(*Hanti-Dhowrista*)

Xisaabaadka Mashruuca waxaa hantidhowraya Hantidhowraha Qaranka.

Qod. 20aad

(*Dhaqangelin*)

Sharcigaanu wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 13 Maajo 1982

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

L A W N. 15 on 13th May 1982, «Mogambo Irrigation Project».

THE PRESIDENT SDR

HAVING SEEN: The Constitution of the Somali Democratic Republic;

TAKING NOTE: Of the approval of the Standing Committee of the People's Assembly;

HEREBY PROMULGATES

The following Low:

Article 1

(Project Formation)

1. An irrigation Project situated on the West Bank of River Jubba, at Mogambo in the District of Jamame (hereinafter referred to as «Mogambo Irrigation Project») is hereby established.

2. The Mogambo Irrigation Project (hereinafter referred to as «the Project») shall have Juridical per-nality.

3. The Project shall be classed as Catagory «A» Project.

4. The Project shall function under the Ministry of Agriculture.

Article 2

(Scope and objectives of the Project)

The Project shall be one of the pioneer projects in the Jubba Valley and its objectives shall include:-

1. The attainment of self-sufficiency in food production and the economic development of the country;

2. The general development of the agricultural production in the country;

3. The construction of flood bunds and water control structures to avoid flood hazards;

4. The establishment within its confines of pilot area of 200 ha owned by individual farmers to facilitate study of comparative productivity of different farming methods;

5. Ensuring the recruitment of qualified and trainable personnel for high and sensitive position, with the assistance of the Somali Government, to act as counterparts for the expatriate personnel and ultimately to replace them;

6. The evaluation of the effectiveness of training program in the 3rd, 4th and 5th years to take the necessary corrective measures; and

7. Setting up an organisational structure and establishment plan for the future of MOGAMBO AUTONOMOUS AGENCY including the drawing up of training programmes of both on-the-job and abroad to carry out future management, and improvements of the project.

Article 3

(Head Office)

The Head Office of the Project shall be at Mogambo (the Project site). Branch Offices may be established at Kismayo or in any other place in the Somali Democratic Republic as may be considered necessary for the proper carrying out of the Project objectives.

Article 4

(P o w e r s)

The Project shall have the power to implement the objectives referred in to Article 2 of this Law.

Article 5

(The Organs of the Project)

The Organs of the Project shall consist of the following:

- a) Higher council of the Project;
- b) Implementation Board;
- c) General Manager; and
- d) Manager.

Article 6

(Higher Council of the Project)

The Higher council of the Project shall consist of the following members:-

- a) The General Manager of the Project, Ghairman;
- b) The Director General of the Ministry of Agriculture, Member;
- c) The Director General of the Ministry of National Planning, » ;
- d) The Director General of the Ministry of Livestock, Forestry & R. » ;
- e) The General Manager of Jubba Valley, » .

Article 7

(The Implementation Board)

The Implementation Board shall consist of:

- a) The General Manager, and
- b) The Managers of the Project.

Article 8

(Functions of the Higher Council)

The Higher Council shall have the following functions:-

- a) Laying down the general policy of the Project and the following-up of its implementation as is stipulated in the agreement;
- b) ensuring that Project is implemented as per the technical specifications, cost, and completion date target.

Article 9

(Functions of the Implementation Board)

The implementation Board is the organ responsible for the project with regard to planning, reviewing and carrying out of the Project activities, and has autonomy in the administrative, financial, technical and all other matters pertaining to the Project objectives.

Article 10

(Appointment of the General Manager and the Managers)

The General Manager and the Managers of the Project shall be appointed by Decree of the President having heard the advise of the Minister of Agriculture.

Article 11

(Powers of the General Manager)

1. The General Manager shall be the executive head of the Project.
2. He shall represent and preside over the deliberations of the implementation Board and shall in particular be responsible for:
 - a) The following-up of the implementation of all Project plans and programmes;
 - b) Negotiating and concluding of contracts for and on behalf of the Project in accordance with the applicable laws and regulations;
 - c) He shall engage the services of a management firm and/or individual experts for the day to day management and the overall execution of the Project as per the relevant Agreements, having taken into consideration the decision of the Implementation Board and the approval of the Minister.

Article 12

(Encluments of the Personnel)

The Encluments and obligations of the personnel shall be those prescribed in Law No 36 of 22 April 1972 and PSRC Decree No. 74 of 22 April 1972.

Article 13

(The Personnel)

The Project may appoint the required personnel in accordance with the Law applicable to the employment of labour; and it is also authorised to recruit the required foreign experts in compliance with the Laws of the State and the approval of the Minister of Agriculture and the institutions financing the Project.

Article 14

(A s s e t s)

The assets of the Project shall consists of:-

- a) The concession of land granted to the Project for development purposes;
- b) Loans or grants obtained by the Project from local or foreign donors;
- c) Any revenues derived from Project activities; and
- d) Any other receipts.

Article 15

(B u d g e t)

1. The Chirman of the Board shall not later than 30th October in each year prepare a budget statement for for the following financial year showing in detail the estimated receiyts expenditures for the Project.

2. The annual budget statement shall be submitted to the Higher Council of the Project presided over by the Minister of Agriculture for approval.

Article 16.

(Annual Accounts)

1. The Financial year of the Project shall commence on 1st January each year and shall end on 31st December each year.

2. The General Manager shall by 31st March each year cause to be prepared final accounts indicating the profit and loss accounts for the previous year and shall submit them to the Ministry of Agriculture.

Article 17

(Authorised Loans)

The Project may, for the proper discharge of its functions, obtain loans from the State Banks and Credit institutions with the prior approval of the Minister of Agriculture and the Minister of Finance.

Article 18

(System of Accounts)

The Accounts of the Project shall be maintained in the manner prescribed by the Laws and regulation issued by the Government for maintenance of accounts.

Article 19

(Auditing)

The accounts of the Project shall be audited by the magistrate of accounts.

Article 20

(Coming into force)

This Law shall come into force upon signature by the President and shall be published in the Official Bulletin.

Mogadishu, 13th May 1982

THE PRESIDENT OF THE SDR
(Major General, Mohamed Sida Barre)

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEERKA MADAXWEYNAHA J.D.S. lambar 31, taariikh 5 Maajo 1982, Meelmarinta Heshiiska lagu asaasay Machadka Maamulka Shaqaalaha Gobolka Afrika oo ku hadla afka Ingiriisiga.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67cd, xubintiisa 5aad iyo Qod. 82aad, xubintiisa 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 14, taariikh 5.5.82 ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska ujeeddada ku qoran;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskaas la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska lagu asaasay Machadka Maamulka Shaqaalaha Gobolka Afrika oo ku hadla afka Ingiriisiga, laguna kala saxiixday Magaalada Jeneva ee Dalka Swiszerland taariikhdu markay ahayd 12 Juun 1979.

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa JDS staan sharci ah, wuxaana dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS.

Qod. 3aad

Xeerkan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 5 Maajo 1982

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

DECREE No 31 on 5th May 1982, Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT SDR

HAVING SEEN: Article 67 (5) and Article 82 (4) of the Constitution of the Somali D.R;

HAVING SEEN: The Law n. 14, on 5th May 82, on the base of which the Peoples Assembly has approved the Agreement to establish the African Regional Labour Administration Centre for English-speaking African Countries, signed at Geneve on 12th June 1979;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES

The following Decree:

Article I

The Agreement to establish the African Regional Labour Administration Centre for English-Speaking African Countries, signed at Geneve on 12th Jun 1979, IS HEREBY RATIFIED.

Article II

This Agreement shall have the force the Law in the Territory of the Somali Democratic Republic and enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic.

Article III

This Decree shall be published in the Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 5 May 1992

THE PRESIDENT OF THE SDR
(Major General, Mohamed Sida Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo Lambarkiisu ahaa 1529 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Afraad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 68.800/= uu iska lahaa Daahir Cabdi Guuleed sida cad warqadda lambarkeedu yahay 333 taariikhdeedu tahay 24.5.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Afraad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'yo (Amortamento) Buug Lam. 1529 oo ku qoran Daahir Cabdi Guuleed aynu ku jirto Sh. So. 68.800/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Afraad u beddelo Jaalle Daahir Cabdi Guuleed Buug Kady oo kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah kaddib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.5.82

GUDDOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo lambar-
kiisu ahaa 11346 lagana soo saaray Bankiga Ga-
nacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarun-
ta kuna qoran lacag dhan Sh. So. 16.057 uu iska
lahaa Mustafa Sheekh Maxamed sida ku cad war-
qadda lambarkeedu ahaa 01333 taariikhdeedu
ahayd 26.5.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka
Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyoo (Amortamento) Buugga Lam.11346
oo ku qoran Mustafa Sheekh Maxamed ayna ku jirto
Sh.So. 16.057/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta
u beddelo Mustafa Sheekh Maxamed Buugga Keydka
ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah kad-
dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30
maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta
Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax
is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.5.82

GUDDOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDU XAQIIQSADAY: Inuu dhumay Jeegga Wareega lambarkiiisuna ahaa 524961 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe kuna qoran lacag dhan Sh. So. 6.202/= uu iska lahaa Ururka Ciyaartoyda ee W. H. Guud sida ku cad warqadda lambarkeeru ahaa _____ taariikhdeedu tahay 4.4.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la Qiimetiro (Amortamnto) Jeegga Wareega Lam. 524961 oo ku qoran magaca Ururka Ciyaartoyda W.H.Guud ayna ku jirto. Sh. So. 6.202/=

WUXUU U FASAXAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe in uu siiyo Ururka Ciyaartoyda W. H. Guud lacagta ku qoran Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman kadib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 beri marka Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan ishortaag laga keenin.

WAXAA LA AMRAYAA

In Go'aan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, lana gaarsiiyo Laanta Dhexe ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed.

Muqdisho, 4.4.82

GUDDOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDI LA ARKAY: Codsiga uu keenay Faarax Cilmi Yuusuf oo uu ku sheegay in uu ka lumay Jeeg Banki (Assegno Bancario) lam. C.C.05972 ay u jartay Wakaaladda Caymiska Qaranka ay ku jirtay lacag dhan Sh. So. 7.352,85;

HADDI LA ARKAY: Warbixinta Shirkadda Caymiska Qaranka lamb. WM./11/795 ee 15.5.82;

HADDII LA ARKAY: Qod.69 Sharciga L.2 ee9.9.1965;

WAXAA LA QIIMETIRAY

Jeegga Banki (Assegno Bancario) lamb. 051972 ee 21.2.82, ay samaysay Shirkadda Caymiska Qaranka Soomaaliyeed kuna socday Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed uuna watay Faarax Cilmi Yuusuf.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed in uu ka bixiyo xisaabta Shirkadda Caymiska Qaranka Soomaaliyeed lacag dhan Sh. Si. 7.352,85 (Toddoba kun saddex boqol-konton labo 85cents.), inuu siiyo Faarax Cilmi Yuusuf kaddib 15 maalmood marka ay ka soo wareegto daabacaadda go'aanka ee Faafinta Rasmiga ah.

WAXAA LA AMRAYAA

In go'aankan la gaarsiiyo Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed iyo Shirkadda Caymiska Qaranka Soomaaliyeed.

Muqdisho, 22.5.1982